

## 4.5 Ma markii ugu horraysa oo aad isku daydo inaad adeegyo hesho baa?

**Ma u baahnahay in aan la xiriiro Wasaarada Adeega Adamiga?**

**Wasaarada Adeega Adamiga [Department of Human Services (DHS)]** ayaa badanaa ah meesha ugu fiican oo laga bilaabo macluumaad raadinta iyo kaalmada adeegyada. Kooxda Intake and Response ee Wasaarada Adeega Adamiga waxaa lagala xiriiri karaa 1800 783 783.

**Maxaan u baahnahay in aan ogaano?**

Xeerka cusub ee linta oo 2006 waxaa la hirgeliyey Juulay 2007. Xeerku waa sheegay dadka qaba cilad jireed, dareen ama xidid, dhaawac maskaxda gaaray, iinta garashada ama daahid ku timid ayaa heli kara adeega iinta.

**Waa maxay Disability Support Register (DSR)?**

Disability Support Register (DSR) waa hab lagu diiwaangeliyo baahida qofka ee joogtada ah iyo tan hadda jirta. Diiwaagelintu waxay kaloo caawintaa qorshaynta mustaqbilka baahida dadka iinta qaba.

**Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan xaq u yeelashada adeega sida waafaqsan Xeerka linta ee 2006 iyo inaad wax ka ogaato Disability Support Register la xiriir Kooxda Intake and Response ee Wasaarada Adeega Adamiga tel 1800 783 783.**

**Maxaan ka ogahay waxa baahidu tahay?**

Qofka iinta qaba iyo qoyskiisa (ama qoyskooda/saaxiibkood) ayaa kala hadli kara urur kasta oo iimeed weydiina kara kaalmo. Waxaa laga yaabaa in aadan hubin waxa baahidaadu tahay, taasina dhib ma leh. Waxay kula eegi doonaan waxaad u baahan tahay iyo adeega ugu fiican oo ku caawimi kara.

**Caawima intee le'eg ayaan heli karaa?**

Helida caawimo aad ka hesho urur iimeed kuma salaysna keliya iin aad qabto waxayse ku salaysan tahay baahida aad qabtaa intay le'eg tahay, marka loo fiiriyo qof kasta oo kale oo codsanaya isla caawimadaas.

**Adeegyadu ma leeyihiin safka sugitaanka?**

Adeegyada badankood waxay leeyihiin shuruudo xaq u yeelasho waqtiga sugitaankuna waa isbedelaa adeegyada kala duwan. Waa fiican tahay inaad wacdo adeegyada iyo barnaamijyada aad danaynayso weydiisuna wixii ka suurtagal ah safka sugitaanka si aad magacaaga ugu qorto.

**Waa maxay u hadlidu?**

Ururadu waxay ku siin karaan adeega u hadlida. Waxay kaa caawimi karaan inaad samayso go'aan aad iyo xalal aad ogtahay. Waxay ku siin karaan macluumaad iyo kaalmo iyo macluumaad lagu caawimayo waxa ugu fiican.

**Maxaan ugu baahnahay inaan sheekadayda mar walba ku celiyo?**

Dhamaan adeegyada kala duwan iyo barnaamijyadu waxay u dhacaan siyaalla kala baxsan sidaas darteed ma jiro si qof walbaa ku ogaan karo xaalladaada. Kani wuxuu noqon karaa jaahwareer. Waxaad codsan kartaa in shaqaaluhu hal adeeg la hadlo haddii aad dareemayso in taasi sahlan tahay, si kasta ha ahaatee, sida waafaqsan sharciga barayfasiga uma baahnid inaad si mucayina u codsato midkaan.

**Waa maxay sharciga barayfasigu?**

Macluumaadka Xeerka Barafasiga ee Fiktooriya (*Victorian Information Privacy Act*) wuxuu u dhigaa mustawayaal sida hay'adaha dawlada Fiktooriya, hay'adaha qaynuuniga ah iyo golayaasha degmooyinku wax uga qabtan macluumaadkaaga shakhsiyeed. Kala hadal ururka aad la xiriirayso qarsoodinimada macluumaadkaaga. Dhamaan adeegyo iyo macluumaad kale oo qoran oo ku saabsan xuquuqdaada iyo masuuliyadkaaga adeegbixiyayaasha iyo adiga oo ah isticmaalaha adeega.

**Waa maxay maaraynta kaysku?**

Maaraynta kaysku siiyo wuxuu siiyaa caawimo adiga iyo qoyskaaga. Maamulaha kayska wuxuu kaa caawimi doonaa qiimaynta, qorshaynta iyo helida macluumaad iyo kaalmooyin iyo isku xirida adeegyadaan. La xiriir Kooxda Intake and Response oo ka tirsan Wasaarada Adeega Adamiga wixii macluumaad tel: 1800 783 783.